

## Sidee ayay OhioRISE uga duwan tahay caymiska caadiga ah ee caafimaadka habdhaqanka ee Ohio Medicaid (ODM)?

OhioRISE waxay diiradda saartaa dhallinyarada u baahan daryeel gaar ah. Inkastoo dhamaan carruurta iyo dhallinyarada ku jira Ohio Medicaid ay heli karaan caafimaadka dhimirka iyo daryeelka cudurka adeegsiga mukhaadaraadka, dadka qoran OhioRISE waxa sidoo kale la siin doonaa adeegyo caafimaadka habdhaqanka ah oo cusub isla markaana horumarsan. Dadka qoran OhioRISE waxay ka heli doonaan dheefahooda caafimaadka habdhaqanka Aetna (qorshaha OhioRISE); adeegyadooda caafimaadka jidheedna waxay ka heli doonaan urur daryeel oo loo maamulo si gooni ah ama adeega-lacagta-ah ee Medicaid.

## Waa maxay sababta adeegyadan ay u bixiso OhioRISE ee aanuu u bixin qorshaha Medicaid ee “caadiga ah” ee Ohio?

Dhallinyarada qaba baahiyaha caafimaad ee habdhaqaneed ee kakan ayaa ka faa'iideysta adeegyada aadka u xoogan iyo habka isku dubaridan ee lagu qorsheeyo daryeelkooda. OhioRISE waxay la shaqeysaa bixiyeyaal iyo ururo badan si ay u xaqiijiso in ubadka ama dhallinyarada la daboolo baahiyahooda iyada oo loo marayo qorshe daryeel oo qiimeeya codadka iyo xulashooyinka carruurta iyo qoysaska.

## Halkeen ka oggaan karaa wax badan oo ku saabsan OhioRISE iyo macluumaadka ku jira buug-yarahan?

Fadlan booqo bogga OhioRISE ee ah: managedcare.medicaid.ohio.gov/ohiorise, ama noogu soo dir iimeyl wixii su'aalo ah OhioRISE@medicaid.ohio.gov.

## Sharciyada Xuquuqda Madaniga ah ee Gobolka iyo Federaalka

Ohio Medicaid waxay raacdaa sharciyada xuquuqda madaniga ah ee gobolka iyo federaalka ee kaa ilaaliya takoorida ama ula dhaqanka sida cadaalad darada ah. Si aan kaaga caawino inaad fahanto buug-yarahan; caawimada luuqadda, adeegyada tarjumaada, kaalmooyin iyo adeegyo dheeraad ah oo bilaash ah ayaa la heli karaa markaad codsato. Waxaad codsan kartaa adeegyadan adigoo ka wacaya Isu-duwaha Xuquuqda Madaniga ah ee ODM/ADA 614-995-9981/TTY 711, fakis 1-614-644-1434, ama iimeylka: ODM_EEO_EmployeeRelations@medicaid.ohio.gov.

Ohio | Department of Medicaid

Waxaa la cusbooneysiiyay
4.21.2022

# OhioRISE

OhioRISE, Resilience through Integrated Systems and Excellence,waa barnaamij daryeel la maamulo oo gaar ah kaas oo diirada saara carruurta iyo dhallinyarada leh caafimaadka habdhaqanka ee kakan iyo baahiyaha nidaamyada badan.

## Yaa ka faa'ideysan kara OhioRISE?

Carruurta iyo dhallinyarada laga yaabo inay ka faa'iidaystaan OhioRISE:

- Waa kuwo leh baahiyo badan oo ka dhashay caqabadaha caafimaadka habdhaqanka,
- Waa kuwo leh baahiyo nidaamyo badan ama halis ugu jira inay si qoto dheer ugu lug yeeshaan nidaamka, iyo/ama
- Waa kuwo khatar ugu jira in lagu meeleeyo meel ka baxsan guriga ama ku laabanaya gurigoodii kana yimid meelayn guriga ka baxsan.

Dhallinyarada qaba baahiyaha nidaamka badan waxay inta badan u baahan yihiin caawimo iyo adeegyada nidaamyada bulshada kuwaas oo ay ku jiraan caddaalada carruurta, ilaalinta carruurta, naafooyinka korriinka, dugsiyada, caafimaadka dhimirka iyo balwada, iyo kuwa kale.

---

## Waa maxay adeegyada gaarka ah ee ay OhioRISE siiso xubnaha?

OhioRISE waxay bixin doontaa adeegyadan caafimaadka habdhaqanka ee cusub lana horumariyay:

- Isu-duwida Daryeelka Xoogan iyo Ka Dhexdhexaadka ah
- Daaweynta Guriga ee Xoogan ee La Horumariyay (IHBT)
- Xarumaha Daaweynta Cudurada Dhimirka ee La Dego ee Ku Yaala Gudaha-gobolka (PRTFs)
- Nasiinta Caafimaadka Habdhaqanka
- Sanduuqa Guud ee Aasaasiga ah
- Adeegyada Xasilinta iyo Wax-ka-qabashada ee Guurguura (MRSS)

OhioRISE

## Yaa u qalma OhioRISE?

Carruurta iyo dhallinyarada laga yaabo inay u qalmaan OhioRISE:

- Waa kuwo u qalma Ohio Medicaid (daryeelka la maamulo ama adeega-lacagta-ah),
- Waa kuwo da'doodu tahay tahay 0-20, iyo
- Waa kuwo u baahan daaweynta caafimaadka habdhaqanka oo mug leh, taas oo lagu qiyaaso iyadoo la adeegsanayo qiimeynta Awoodaha iyo Baahiyaha Carruurta iyo Dhallinyarada Ohio (CANS).

Carruurta iyo dhallinyaradu waxay kaloo xaq ugu yeelan karaan OhioRISE xaalado gaar ah oo degdeg ah dartood. Tusaale ahaan, haddii ilmaha ama dhallinyarada dhakhtarka loo dhigo sababo caafimaadka habdhaqanka.

---

## Waa maxay qiimeynta CANS?

Qiimaynta CANS waa qalab loo isticmaalo in lagu go'aamiyo xaq u yeelashada OhioRISE. Waxay soo ururisaa qisada qofka dhallinyarada ah iyo qoyska si loo fahmo baahiyahooda iyo awoodahooda, iyo si ay gacan uga gaysato go'aaminta hababka ugu fiican ee caawimada loo bixinayo. Qiimeynta CANS waxa loo cusbooneysiiyaa si joogto ah si ay gacan uga geysato qorsheynta daryeelka ee joogtada ah.

---

## Halkee ayay ilmaha ama dhallinyaradu tagi karaan si ay u helaan qiimeynta CANS?

Si aad u codsato qiimeynta CANS, la xiriir:

- Ururka daryeelka la maamulo ee ilmaha ama dhallinyarada,
- Aetna Better Health of Ohio,
- Hay'adda maamulka daryeelka ee deegaanka,
- Khadka Macmiilka ee Medicaid, ama
- Bixiyeyaasha caafimaadka habdhaqanka ama Golayaasha Koowaad ee Qoyska iyo Carruurta, kuwaas oo laga yaabo in ay goobta ku haystaan qiimeeye CANS ah ama ay awood u leeyihiin inay ku xidhaan mid.

## Goorma ayuu ilmaha ama dhallinyaradu bilaabi karaa helitaanka adeegyada OhioRISE?

Kadib qiimeynta CANS, carruurta iyo dhallinyarada la oggaaday inay xaq u leeyihiin ayaa la diiwaangeliyaa OhioRISE isla taariikhda qiimeyntooda CANS ay soo gudbiyeen. Xaaladaha degdega ah, isqorista OhioRISE waxay noqon doontaa:

- Taariikhda dhigista cisbitaalka bukaan-jiifka ee jirada dhimirka ama cilladda adeegsiga mukhaadaraadka ama
- Taariikhda dhigista Xarunta La Dego ee Daaweynta Dhimirka (PRTF).

---

## Isqorista OhioRISE ma waajib baa?

Haa, haddii ilmaha ama dhallinyaradu uu xaq u leeyahay OhioRISE, isqorista OhioRISE waa waajib. Haddii ilmaha ama dhallinyaradu uusan xaq u lahayn, ogeysiiska diidmada iyo xaqa uu u leeyahay dhageysi ayaa loo diri doonaa. Haddii ilmaha ama dhallinyarada ama waalidkoodu/mas'uulkoodu uusan rabin in la diwaangaliyo OhioRISE, waxay codsan karaan in laga saaro. ODM ayaa dib-u-eegi doonta codsiga waxaanay go'aamin doontaa haddii ka saaristu ay habboon tahay. Ilmaha ama dhallinyarada laga saaro OhioRISE ma awoodi doono inuu helo adeegyada cusub iyo kuwa la horumariyay sababtoo ah adeegyadan waxaa laga heli karaa OhioRISE oo kaliya.